

Sharciga 28 Noofember 1961, lamba. 25

Unkidda Calamada Militariga.

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Markuu arkay oggolaansha Golaha Xeerdejinta Qaranka;

WUXUU GUDDOOMINAYA SOONA SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Waxaa la unkay Calamada Qaranka, ee Ciidamada Qalabka Sida, ee Dowladda, iyagaas (calamadass) waxa ay qaadanayaan guud, ee “Calamada Militariga”.

Qod. 2

Calamada Militariga waa laba nooc:

- Calan Dagaal;
- Calan Degaan Ciidan.

Qod. 3

Calanka Dagaalka waxaa ka joogaa astaanta sharafka miltari waxa uuna raacayaa Taliska iyo Cutubka loo dhiibo, dhammaan noloshooda waqtiga nabadda ama dagaalkaba. Isagaas (calankaas) madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa ku wareejinaya (gacata u gelinaya) Talisyada Ciidamada Qalabka Sida iyo cutubyada dagaal ama oo ayagaas hoos yimaada.

Qod. 4

Calanka dagaalka waxa uu leeyaha isla astaamaha Calanka Qaranka. Cabbirradiisa waxaa lagu jaangooyey 1,50 mitir oo dherer ah iyo 1,00 mitir oo ballar ah, oo la suray ul bira oo 2.20 mitir ah oo.

Lagu dahaaran maro jilicsan oo blúug ah oo laga dhigay, labada daraf looga yeelay caarad iyo falaar bir ah oo dahabi ah. Falaarta hoosteeda waxaa ku qodban cad maro oo xariir buluug ah oo ballarkeedu yahay 12,00 cm, oo labada darafna laga qurxiyey, darayadana laga dhigay boqor laba-laab ah oo 1,20 mitir ah. Dhinacaas waxaa looga tolays daabac dahabi ah oo tilmaanta ah Taliska ama Cutubka oo iska leh Calanka iska leh.

Qod. 5

Calamada degaankaciidan waa:

- a) — nooca 1^{aad} (ballar 4,50 mitir – dherer 3,00 mitir) oo la siiyo xafiiska Wasaaradda Difaaca (gaashaandhigga);
- b) — nooca 2^{aad} (dherer 3,50 mitir – ballar 2,00 mitir) oo la siiyeyd lagana taago dhismooyinka Talisyada Ciidamada Qalabka Sida, ee dowladda;
- c) — nooca 3aad (ballar 2,25 mitir – dherer 1,50 mitir), oo la siiyo Talisyada fadhiyada

(xeryaha/degaannada) Militari. Calamada fadhiyada waxa ay leeyihiin isla astaamaha Calanka Qaranka.

Qod. 6

Sharafka, mudnaanta, hawlgalka iyo bandhigidda Clamada Militeriga waxaa nidaamiya xeerarka nidaamka oo loo soo saarayo hirgelinta Sharcigan.

Sharcigan waxaa la gelinayaa Ururinta Rasmiga, ee Sharciyada waxaana lagu nashrinayaa Faafinta Rasmiga ah, ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 28 Noofember 1961.

Aden Cabdulle Cusmaan

Wasiirka Kowaad

Cabdirashiid Cali Sharmaarke

Wasiirka Difaaca

Shekh Cali Ismaaciil